

Shaqo

Halkan waxad ka baran kartaa meelaha shaqooyinka laga helo, sida shaqooyinka loo codsado iyo sida loo dhaqmo shaqada dhexdeeda. Waxa kale oo boggan ku jirta waxoogaa warbixin ah oo ku saabsan waxyaalaha uu dadka u fidiyo xafiiska shaqadu.

Shaqooyin badan ayay lagama maarmaan u tahay in aad lahaato nooc waxbarasho oo gaar ah. Sababaha ay dad badani shaqo u la'yihiin waa iyagoo aan lahayn waxbarashada ama waaya-aragnimada shaqo ee ay shaqo-bixiyayaashu u baahan yihiin. Laakiin waxa jira shaqooyin badan oo ay qaban karaan dadka aan lahayn waxbasho gaar ahi. Shaqooyinka aan u baahnayn waxbarasho gaar ah waxa loo yaqaanaa "shaqooyinka xirfadlaaweyaasha". Shaqooyinkaas waxa ka mid ah xannaannaynta bukaanka ama waayeelka, caawiyeyaasha xannaanooyinka carruurta, nadaafadda, ka shaqaynta dukaamada, qaybinta wargaysyada, gudbinta telefonada xafiisyada iyo caawinta jikada (kusheenka). Qaar ka mid ah shaqooyinkaas waxad tababar ku saabsan ku qaadan kartaa koorsooyinka ama tababarrada shaqo ee uu bixiyo xafiiska shaqadu.

Shaqo helid

Waxa jira meelo badan oo aad ka heli karto warbixinno ku saabsan shaqooyinka bannaan. Marka aad shaqo doon tahay, waxa aad eegi kartaa ogaysiisyada wargeysyada ku qoran ama "Internet"ka. Boggan www.velkommenoslo.no waxa ku jirta qormo ku xidhan ogaysiisyada shaqo ee "Internett"ka. Waxa kale oo jira qaabab kale oo shaqo loo helo. Inta ugu badan shaqooyinka bannaan lama baahiyo. Warayso saaxiibadaa iyo dadka aad is taqaaniin, ama la xidhiidh shaqo-bixiyayaashaadii hore oo weydii shaqo. Qaabka sidan ah waxa loo yaqaanaa in la isticmaalo dadka kugu xeeran. Waxa kale oo aad toos ula xidhiidhi kartaa shaqo-bixiyayaasha aad jeceshahay in aad u shaqayso. Haddii aad doonayso in aad toos ula xidhiidho goob shaqo oo aydaan hore isu aqoon, waa in aad si fiican uga sii diyaar garowdaa.

Oslo waxa ay u qaybsan tahay xaafado. In badan oo xaafadaha ka mid ah ayaa leh xafiisyo kugu caawin kara sidii aad shaqo u heli lahayd. Xafiisyada sidan oo kale ah waxa lagu magacaabaa xafiiska adeegga (servicekontor), xarunta shaqada (jobbsenter) ama xarunta xirfad abuurka (kvalifiseringssenter). Boggan www.velkommenoslo.no waxanu ku ururinay cinwaanadda dhammaan xaafadaha leh xafiisyadan oo kale. Waxa kale oo boggan ku jira cinwaanada dhammaan xafiisyada shaqada ee Oslo. Haddii aad doonayso in aad samaysato goob shaqo oo adiga kuu gaar ah, waxanu kuu haynaa meelaha aad la xidhiidhi karto ee aad ka heli karto caawimo lacag la'aan ah oo arrintaas ku saabsan.

Codsasho shaqo

In shaqooyin la codsadaa waxa ay u baahan tahay wakhti dheer. Inta badan waa in aad shaqooyin badan codsi u qortaa ilaa inta uu nasiibkaagu ku siinayo shaqo. Marka aad aragto shaqo ee aad doonayso in aad codsato, waxa habboon marka hore in aad shaqo bixiyaha la hadasho (telefon) oo aad waydiiso faahfaahin dheeraad ah, ka dibna aad codsi u qorto. Waxa muhiim ah in codsiga uu si fiican u qornaado, in aad ku muujiso waxa uu shaqo bixiyuhu filanayo iyo in aad sharaxdo sababta aad ugu habboon tahay shaqadan. Boggan www.velkommenoslo.no waxad ka helaysaa tusaalooyin sida loo qoro codsi shaqo oo fiican. Waxa kale oo fiican in aad codsiga ku lifaaqdo "CV" gaaga. "CV" waa warbixin si kooban u sharxaysa wixii aad ka soo shaqaysay iyo waxbarashadii hore. Haddii aad hayso caddaymo waxbarasho ama caddaymo shaqo oo aad dalkaagii kala timi, waxa fiican in aad norweji ku turjunto. Haddii shaqo bixiyuhu tuhunsan yahay in aad shaqada ku habboon tahay, waxa laguugu yeeri karaa waraysi shaqo (interfyyu) si shaqo-bixiyuhu uu uga dhergo waxa aad taqaan iyo qofka aad tahay.

